[Somali]

Saint Paul BLAST OFF TO KINDERGARTEN

# Febraayo

## Dugsiga Ha Laysu Diyaariyo

### Xirafadaha Layliska Bishaan

• U soo gad qalabka lagu cayaaro, nooca cayaaraha iyo qalabka guriga yaala oo ilmahaaga ku gubaabinaya in wax indha indheeyaan, ay su'aalo wediyaan, iyo bilaabaan in ay khayaali abuuraan.
• Waxa aad siisaa fursadoyin uu ilmahaaga la cayaaro iyo uu u dhexgalayo ilmaha kale siyaaboyin kala duwan: beerta lagu nasto, meelaha lagu cayaaro, maktabadda, meelaha lagu cibaadysto. Cunuggaaga ku tababar in xaqdhowro dadka ka soo horreyey, wax wadaagga, iyo in dadka kale la caawiyo.

### Hawlaha

•Ilmahaaga ku dhirriigali in ay wax indha indheeyaan. Waxyaalaha ay ku cayaaraan oo ay dibadda ama gudaha ku isticmaalan ka qari oo ilmhaagaa meesha haa ka soo saaran.
• Ilmahaaga ku dhirrigali in ay isticmaalaan xargo, shayo sharaxaadyo weyn, baasta dhexdeeda duleesho, ama guluusyo laga sameeyo kuul, ama jijimo ama qaabab kale.
• Ilmaha u ogolow in alabaha yar yar in kala soocaan ayadoo shayada kala leh cabbirka, qaabka, midabka duwan lagu rido bokis ama baaquli.
• Ilmahaaga cayaata jar kabooddo iyo cayaaro kale. Cayaaraha noocaan waxa ay caruurta baraan in ay sugaan inta laga gaarayo markooda iyo waxa kale ay ku caawisaa dulqaadashada iyo caawimaad leh.
• La abuuro meel guriga ee gaar u ah cayaaraha oo la isticmaalo shayada sida maryaha iyo waxyaalo kale ee guriga laga helo si ay markaasi caruurta caqligooda qiyaaliga u isticmaalaan oo wax kasta iska dhigaan.
• Ilmahaaga u sheeg in ay isbarto dadka marka ay marka ugu horreyso qof cusub kulmayaan iyo saxiibbo cusub la samaysanayo.

**Buugagga Caruurta** Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka www.blastofftok.org
• *I Spy* books ay qortay Jean Marzollo
• *The 13th Clue* ay qortay Ann Jonas
• *Enrico Starts School* ay qortay Charlotte Middleton
• *The Big Blue Spot* uu qoray Peter Holwitz

**Buugagga Waalidka** Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka www.blastofftok.org
• *Treasure Hunts! Treasure Hunts! Treasure Hunts!* uu qoray Lenny Hort
• *Everybody Wins: Non-Competitive Games for Young Children* u qoray Jeffrey Sobel
• *The Creative Curriculum for Preschool* ay qortay Diane Trister Dodge

## Akhris Ha Laysu Diyaariyo

### Layliska Xirfadaha Bishaan

• Ilmahaaga u sheeg shekoyin ku saabsan waxyaabaha aad wada wadaagtaan kaddibna weydii in uu shekooyinka dib uu ilmahaaga kuugu soo celiyo. Buugag iyo heeso isku dhawaaq leh ama la yaqaano sida ay ku dhammaanayaan, si markaasi ay ugu fududaato ilmahaaaga in uu korka ka barto oo kuwa kale la wadaago.

## Caafimaadka Ha Laga Qaado

### Xirfadaha Layliska Bishaan

• Iska hubso in ilmahaaga uu haysto wakhti uu ku jimicsado maalinkasta, siiba guriga bannaankiisa haddi ay suutogal tahay. Caruurta badankooda waa ay ordain, boodan, meelaha koraan iyo laalcshoodaan marka ay noqdaan afar jirro.

**Faahfaahin dheeraad ah booqo shabakadda internetka *www.blastofftok.org***